

## **Nasteexooyin loogu talagalay dhawrista caddaynta ama daliilka iyo macluumaadka**

Waxaa dhici karta in aad aragtay ama ogtahay wax kugu caawin kara Weydiinta ama Baarista.

Haddii ay suurtoagal tahay waa in aad isku daydid oona hoos ku qortid wax kasta oo aad u malaysid in ay xiriir la leedahay marka ay xusuustaadu saafi tahay.

Hoos waxaa ku qoran nasteexooyin lagu samaysanayo diiwaan sharci ahaan noqon kara mid faa'iido baddan.

Laakiin dukumeenti kasta markhaati/badbaade/gablamaha xubinka qoyska la diyaariyo waxay u badantahay in la ka shifo dembi kasta ama hawlo rayid iyo baarista/ weydiinta.

Sidaas darteeda, biloowga, waxaa wanaagsan in la raadiyo tallo sharciyeed kahor inta aan la diyaarinin dukumeentigaas oo kale.

Wixii khuseeya tallo ama caawimaad ku saabsan helida qareen fadlan la xiriir **BAARITAANKA** deeqda ([020 7263 1111](tel:02072631111)) ama Xarunta Sharciga Waqooyiga Kensington ([020 8969 7473](tel:02089697473)).

### **Sidee loo qoraa caddaynta ama daliilka.**

1. Adiga oo isticmaalaya luuqadaada, u qor taariikhda iyo wakhtiga sida ay isugu xigaan waxyaabaha aad aragtay/maqashay, adiga oo caddaynaya haddii aad adiga wax aragtay ama macluumaad uu qofkale kuu sheegay, adiga oo sheegaya qofkaasi.
2. Qor magaca, cinwaanka shaqada iyo faah-faahinada xiriirka qofkasta oo aad kala hadashay arintan tusaale ahaan, sarkaal booliis, shaqaale muhiim ah, qof iskaada ah, saaxiibo, iyo haddii ay qoreen macluumaadka aad u sheegtay.
3. Isku day intaad awoodid in aadan ku darin waxa ay dadku kaaga sheegeen wixii ay arkeen ama maqleen. Weydii in ay qoraan oona midaan ka samaystaan qoraal gooni ah.
4. Haddii aad ka wel-welsantahay in aad siisid qaar ama dhammaan macluumaadka ku saabsan wixii aad soo aragtay ama maqashay qofkale, qor waxa aad ka wel-welsantahay.
5. Hoosta qoraalkaaga ku dar wakhtiga iyo taariikhda aad samaynaysid qoraalka – ku hay dukumeentigan (qoraalka-gacanta ama elektarooniga ah) meel ammaan ah.

**6. Waxaad ku dari kartaa macluumaad dheeraad ah dukumeentiga intiiba aad soo xasuusatid laakiin iska hubso in aad ku dartid taariikhda marka aad sidaan samaynaysid.**

**7. Haddii aad haysid wax sawiro ah, diiwaano iwm. oo ah wax xiriir la leh arintan iska hubso in aad ku keydisid kombiyuutarkaaga. Raadi tallo haddii aadan oggayn sida midaan loo sameeyo.**

**Haka wel-welin waxa ku saabsan haddii aad u malaysid in macluumaadka la isticmaalayo ama haddii aan la isticmaalaynin. Waa muhiim in la aruuriyo macluumaad baddan intiiba ay suurtoagal tahay kuwaas oo laga aruuriyo dadka arkay ama maqlay wax ku saabsan maalinta uu dabku dhacay ama muddada kahor ama kadib, ay kujirto wel-welada khuseeya ammaanka.**